# Sida aad ugu Doodi Karto Ilmahaaga iyo Naftaada Iskuulka Dhexdiisa

## Waa maxay U-doodiddu?

U-doodidda ilmahaaga waxay ka dhigan tahay inaad u hadasho oo aad tallaabo u qaaddo si aad u taageerto baahiyahooda iyo xuquuqdooda. Waxaa kale oo ay ku lug leedahay in laga shaqeeyo isbeddellada ku yimaada hab-dhaqanka iyo go'aamada iskuulka, oo aan ahayn kuwa ilmahaaga oo keliya, laakiin sidoo kale ardayda kale ee luuqadaha badan ku hadla iyo qoysaskooda. U-doodiddu waa adeegsiga codkaaga si aad gacan uga geysato abuurista isbeddel togan oo waxbarasho iyo bulshada iskuulka guud ahaan. Marka ilmuhu korayo, waxaa muhiim ah inay ku arkaan adigoo u doodaya—si ay u bartaan sida ay naftooda ugu doodi lahaayeen marka wakhtigeedu la gaaro.

## Maxay Muhiim u Tahay in Qoysasku u Doodaan Carruurtooda?

- Waxay wanaajisaa wada-xiriirka iyo wada-shaqeynta u dhexeeya guriga iyo iskuulka.
- Waxay xaqiijisaa in ardaydu helaan taageerada ay u baahan yihiin.
- Waxay xoojisaa kalsoonida iyo hoggaaminta ardayda iyo qoysaskooda.
- Waxay kor u qaaddaa jawi waxbarasho oo arday kasta uu ku helo fursado waxbarasho oo macno leh.

## Sidee Ayaad Si Firfircoon Ugu Doodi Kartaa Ilmahaaga iyo Naftaada?

**Xiriiro dhiso:**

- Baro macallimiinta ilmahaaga, la-taliyayaasha iyo maamulaha iskuulka.
- La xiriir waalidiinta kale si aad isu taageertaan.

**Qaad tallaabo degdeg ah:**

- Walaacaaga la wadaag isla markiiba.
- Ha sugin inta ay arrimuhu ka sii darayaan.

**Ka qaybqaado nolosha iskuulka:**

- Kala shaqee macallimiinta iyo ilmahaaga dejinta yoolalka sanad-dugsiyeedka iyo helidda xalalka arrimaha soo ifbaxa.
- Ka qaybgal shirarka iyo munaasabadaha iskuulka intii aad awooddo. Soo jeedi siyaabo kale oo aad jeclaan lahayd inaad uga qayb qaadato.
- Sii wad wada-xiriirka macallimiinta iyo shaqaalaha iskuulka oo ka qaybqaado waxbarashada ilmahaaga.

**Fikrado Kale:**

- Maxay yihiin fikradaha kale ee aad ka qabto muhiimadda ay leedahay u-doodidda iyo siyaabaha aad ugu doodi karto ilmahaaga iyo naftaada labaduba?

WIDA
UNIVERSITY OF WISCONSIN–MADISON

wida.wisc.edu

WIDA is housed within the School of Education at the University of Wisconsin–Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA